

Leenka Cusub ee METRO H



Gaadiid kuwii hore ka dhaqsa badan ayaa ka soo shaqa galaya marinka Como Avenue iyo Maryland Avenue

Leenka METRO B waa leen Gaadiidka Basaska Dheereeya kaas oo bixin doona adeeg gaadiid degdeg ah oo la isku halayn karo oo ka shaqeeya jidka Como Avenue iyo Maryland Avenue. Basaska mara Leenka H iyo boosteejooyinku waa kuwo raaxa leh oona sahlan in la isticmaalo.

Laga bilaabo galbeed ilaa bari, Leenka H wuxuu Minneapolis uga gudbi doonaa Washington Avenue, Pleasant Street/15th Avenue, Como Avenue, Maryland Avenue, iyo White Bear Avenue ee St. Paul.


Leenka mustaqbalka la dhisi doono ee METRO G iyo Jidka cusub ee 66 labaduba waxay adeeg gaadiid siin doonaan faras-magaalada St. Paul, iyadoo laga beddelanayo gaadiidka Leenka H. Adeegga gaadiidku wuxuu ka sii shaqayn doonaa marinka Energy Park Drive iyo Front Avenue, iyadoo la isticmaalayo Jidka cusub ee 66.

Metro Transit waxay qorsheyneysaa goobaha boosteejada Leenka METRO H

FAALLO KA DHIIBO UGU DANBAYN ARBACADA, OKTOOBAR 7



Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo metrotransit.org/h-line-project



Jadwalka Mashruuca Hordhaca (waa la bedeli karaa)

• 2025-2026

QORSHAYNTA

• 2026-2027

INJINEERNIMO

• 2028-2029

DHISMO

CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:

Alyssia Bell, Isuduwaha Wacyigelinta

HLine@metrotransit.org

763-358-0219



metrotransit.org/h-line-project

Bus Rapid Transit (Nidaam Gaadiid Bas oo Mashquul badan): Gaadiid dhaqso badan, la isku halayn karo, oo raaxo badan

Metro Transit waxa ay horumarinaysaa shabakada leenanka bus rapid transit (gaadiidka mashquulka badan ee baska) ee gobolka Twin Cities. Habkan wax ku oolka ah ee loo dedejiyo adeegga ayaa si weyn u wanaajinaya khibradda macmiilka waxayna caddaysay inay soo jiidato dad badan si ay si joogto ah u isticmaalaan gaadiidka



Boosteejooyinka xaafadaha oo leh adeegyo

Boosteejooyinka waxaa lagu qalabeeyay sifooyin loogu talagalay waayo-aragnimo badbaado iyo raaxo leh, oo la mid ah tareenka korontada ku shaqeeya.

- NexTrip macluumaadka waqti saxda ah ee gaadiidka imaanaya iyo marka uu baxayo
- Kulaylka la rabo, nalka amniga, iyo isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah
- Goob kor u qaadan oo gaadiidka laga fuuli karo – ugu lugaa baska adigoo wax jaraanjaro ah u fuulin
- Meelaha la saarto Baaskiilka iyo weelka qashinka

Joogsiyo xadidan, adeeg joogto ah

BRT waxay shaqayn doontaa 10kii daqiiqoba mar inta badan maalinta iyada oo saldhigyo ku leh 1/3 ilaa 1/2 mayl kasta.

Sida qorshaha leenka kasta u sii socdo, Metro Transit waxay qiimayn doontaa suuqa iyo baahida loo qabo adeega baska deegaanka oo lagu soo kordhiyo wadada.

Bixinta qiimaha safarka kahor inta aan la gaarin joogsiyada degdega ah

Si aad dhakhso ugu gasho albaabada oo dhan, basaska BRT ma qabaan sanduuqyada lacagta lagu rido. Macaamiisha ayaa iibsaa doona tigidh ama waxay ku taaban doonaan Go-To Card mashiinta taala boosteejada, sida tareenka korontada ku shaqeeya. Kormeerka lacagta waxa samayn doona wakiilada TRIP.

Kaabayaal cusub si loo kordhiyo xawaaraha

Marka lagu daro saldhigyada la hagaajiyay iyo kala dheeraynta joogsiga ballaaran, Metro Transit iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa sahaminaya fursadaha si ay xadadkan BRT uga dhigaan mid aad u dheereeya. Doorashooyinka waxaa ka mid ah:

- Mudnaanta ishaarada si aad u sii socoto; basaska waxay "weydiisan karaan" nalalka cagaaran ee hore ama fidsan ee isgoysyada qaarkood
- Jidadka baska-kaliya ee ku teedsan qaybo ka mid ah leenka si basaska looga ilaaliyo taraafikada